

# KU BIIR KA HORTAGA TODDOBAADKA FAKHRIGA 17-23 OKTOOBAR 2010

Toddobaadka ka hortaga Fakhriga ee 2010 wuxuu bilaabanaya Axada 17-ka Oktoobar wuxuuna dhammaanayaa Sabtida 23-ka Oktoobar. Maalinta Ka hortaga Fakhriga Caalamiga ah ee UN-ta waa Axada 17-ka Oktoobar

Toddobaadku wuxuu xoogga saarayaa fakhriga aduunka oo dhan, khaas ahaan dalalka ugu faqiirsan laakiinse sidoo kale dalalka ugu qanisan sida Australia. Ujeedooyinkiisa ugu waa weyn waxay yihiin:

- >> **xoojinta fahamka dadweynaha** ee waxyaalaha sababa iyo cawaaqibka fakhrinimada iyo dhibka aduunka oo dhan iyo Australia gudaheeda;
- >> **dhiirigelinta, cilmi baarista, wadahadal iyo ficil** lagu soo qaadanayo dhibaatooyinkan, oo ay ku jiraan shakhsiyaadka, bulshooyinka, ururada iyo dawladaha.

Xiisahiisu aad buu u kordhayey Australia dhexdeeda sannadihii ugu danbeeyey waxqabadka sida muxaadaroooyinka dadweynaha, hoosooyinka macluumaadka, shirarka, doodaha, riwaayadaha, bandhigyada, maalmaha ciyaaraha, waxsheega warbaaxinta ee kooban iyo dhacdooyin kale ayaa la soo qabanqaabiyey.

Sannadkii hore, ugu yaraan 500 oo urur oo Australia oo dhan ah ayaa ka soo qaybgalay wax ka badan 400 oo waxqabad intii uu socday toddobaadka , oo ay ahayd wadarta dadka soo xaadiray oo ka badneyd 10,000 oo qof.

## Waxoogaa qorshayaal ah iyo tallo soo jeedino

Qofkasta oo doonaya inuu yareeyo fakhriga iyo dhibka waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu soo qabanqaabiyo waxqabad inta toddobaadku socdo ama uu ku soo biiro kuwo ay soo qabanqaabiyeen dad kale. Waxqabadka wuxuu noqon karaa mid balaadhan ama yar, waxbaqabadka heerarka degaankaaga ah si gaar ah ayaa loo soo dhaweynayaa. Waxay ku saabsanaan karaan mawduuc kasta oo ay doonaan, maalmihii kasta ee ku haboon soo qabanqaabiyayaashooda.

Furitaanka rasmiga ah ee waxqabadyada waxaa la qabanqaabin doonaa Axada 17-ka Oktoobar iyo Isniinta 18 Oktoobar. Waxaa lagu tallinayaa inay dadku soo qabanqaabin karaan fikrad isweydaarsiyo xaafadeed oo ah ka hortaga fakhriga Arbacada 20 Oktoobar, iyo lacala ku martiqaadida MP –yada xaafada iyo Duqa magaalada inuu ka soo qaby galo.

Waxay noqoneysaa wax aad u caawimo badan haddii qabanqaabiyayaashu ay keenaan faahfaahinta qorshahooda si loo geliyo website ka khaaska ah ee , [www.antipovertyweek.org.au](http://www.antipovertyweek.org.au), si loo dhiirigeliyo ka soo qaybgalka iyo kicinta ficilka dadka kale.

Website ka sidoo kale waxaa ka mid ah warqadaha xaqiiqda ee aasaasiga ah, qalabka xayeysiineed ee korloogu qaadayo iyo xiriirada ilaha macluumaadka iyo fikradaha ku saabsan siyaalaha loo yareynayo fakhriga iyo dhibka.

Si aad noo soo wargeliso qorshayaashaada ama aad u hesho macluumaad dheeraad ah, nagala soo xiriir:  
**1300 797 290** ama **apw@antipovertyweek.org.au**

Qaarka mid ah waxqabadyada ka hortaga fakhriga ee suurtagalka ah			
>>Shirar	>>Fikrad isweydaarsi	>>Bandhigyo	>>Dhacdooyinka warbaahinta
>>Siminaaro	>>Hoosooyin macluumaad	>>Jilid	>>Doodo
>>Wax u raadin	>>Muxaadaroooyinka dadweynaha	>>Sahamin	>>Soo shaacbixin
>>Daabacaadyo	>>Qoraalo wax lagu taageerayo	>>Bannaan baxyo	>>Imw

*Daabacaada bosterkan waxaa suurtoogeliyey taageerada deeqsinimada leh ee Salvation Army ( Eastern Territory)*